

## Caqabad soo waajahday wadahalada Ceel-bardaale

Thursday, 04 June 2009

Hargeysa (Geeska) &ndash; Gudoomiyaha guddiga guurtida ee dhex-dhexaadinta shaqaqaddii ka dhacday dhawaan deegaanka Ceel-bardaale Maxamed Maxamuud Diiriye ayaa sheegay in ay ku gudda jiraan wajigii ugu danbeeyey ee wada-hadalada xalka loogu raadinayo dhibaataada dadka walaalaha ah ee deegaankaasi.

Shalay oo loo balansanaa kullaan la sheegay in guddiga dhex-dhexaadintu kaga dalbatay labada dhinac inay keenaan wixii cadaymo ah ee uu mid kastaaba ku kabayo doodiisa hore loo dhegaystay ayaa baaqdey, ka dib markii ergadii ka socotay dhinaca deegaanka Dilla ay ka kaceen shirka.

Gudoomiyaha guddiga dhex-dhexaadinta oo arrintan Radio Haryaal ka waraysatay ayaa ku dooday in arrintu meel fiican u marayso ilaa hadda. Isaga oo ka jawaabayey dib u dhaca kulanka shalay iyo sababta keentay waxa hadalkiisa ka mid ah oo uu yidhi, &ldquo;Waxa la yidhi maan rag waa mudacyo Afkood oo isma wada-waafaqsana&hellip; laakiin, si kastaba ha ahaatee, hawshu waxay maraysaa cadaymihii, waxa dhamaatey doodii, waxa dhamaatey oo kale arragtiddii la dhiibanayey, waxa iyana jirtay kalsoonidii dhiinacyadu bixiyeen. Markaa, ta cadeynta oo immika muddo dhawr iyo toban cisho ah la sugayey ayay balantii u danbeysay ahayd maanta {Shalay} in lala yimaado. .. odhan maayo beeshii, laakiin waa jireen xubno madasha ka istaagey oo yidhi waanu tageynaa, mase tagin ee waa joogaan iyaga ayaa dhexdooda wada hadlaya.. hawshiina si fiican ayaa ay noogu socotaa waxaan rajeynaynaa in ay maal-maha soo socda si fiican u soo dhamaan doonto.&rdquo;

Dhinaca kale, Cali Xaaji Xirsi oo ka mid ah odayaasha deegaanka Dila oo laga waraystay sababta ay u diideen kullanka shalay ayaa sheegay in ay shirgudoonka golaha Guurtida u gudbiyeen qoraal ay kaga cabanayaan guddiga dhex-dhexaadinta, islamarkaana ay ka warsugayaan shir-gudoonka Guurtida. Waxana uu ku dooday in odayaal ahaan ay ku tashadeen in aanay ka maqnaan madasha wada-hadaladu hore uga socdeen ee magaalada Kala-baydh, taasina ay ahayd sababta ay uga soo xaadireen shalay madasha, balse ku tala-galkoodu ahaa in aanay ka qayb-gelin dacwadda kana qay-gelin, taasina ay keentay inay madasha ka baxaan markii gudoomiyuhu bilaabay.

Source: [www.geeska.net](http://www.geeska.net), Wargeyska Geeska Afrika, Hargeysa